



## Kordhinta Caawimaada Loogu Talagalay Qoysaska Shaqeeya ee Washington

Kahor cudurka safmareenka ah, Waaxda Ganacsiga ee Gobolka Washington waxay ogaatay in in ka badan nus milyuun caruurta ku nool Washington aysan helin daryeelka carruurta ee ruqsadda haysta. Tani waxay saameyn weyn ku leedahay waalidiinta shaqeeya ee Washington. Ku dhowaad mid ka mid ah shantii waalidba waxay soo sheegaan inay diideen fursad shaqo ama dalacsiin sababo la xiriira arrimaha daryeelka carruurta, badanaa waalidiinta madowga iyo kuwa dhaladka ah ee Mareykanka.



Ku dhowaad nus ka mid ah waalidiinta shaqo la'aanta ah ayaa sheegey in arrimaha daryeelka caruurta ay caqabad ku yihiin shaqo raadinta



Daryeelka carruurta waxaa ku baxa 35% ee dakhliga labada waalid ee qoysaska ku nool gobollada kharashka badan



Daryeelka carruurta waxaa ku baxa 150% ee dakhliga qoysaska halka waalid keli ah leh ee ku nool gobollada kharashka badan

Barnaamijka kaabista daryeelka caruurta ee Washington ee loogu talagalay qoysaska dakhligoodu hooseeyo, Xiriirada Shaqada, wuxuu ka horjoogsan karaa waalidiinta shaqeeya inay aqbalaan kororka (ama gargaarka aafada) maxaa yeelay dakhliga oo kordha badanaa wuxuu sababaa koror aan la awoodi karin ee ku yimaada kharashaadka daryeelka carruurta.

Dhanka kale, masiibada/aafada ayaa sii xumaysay dhibaataadii ka jirtay qeybta daryeelka caruurta ee Washington.

- Qoysaska shaqeeya ee leh carruur gaartay da'da iskuulka ayaa ku mashquulsan sidii ay u heli lahaayeen barnaamijyo daryeeli doona carruurtooda oo ka caawin doona waxbarashadooda khadka tooska ah.
- Kharashka lagu bixinayo daryeelka carruurta ee aaminka ah ayaa si aad ah kor ugu kacay sababo la xiriira saamiga shaqaalaha loo heli karo daryeelka carruurta oo hoos u dhacay si loo dhiirageliyo kala fogaanshaha jireed ee dadka iyo kharashyada badan ee la xiriira nadaafada oo kordhay. Kharashaadkaas waxaa loo gudbiyay qoysaska shaqeeya.
- Xarunta Qoyska ee Barnaamijka Child Care Aware ee Washington waxay ogaatay in qoysaska dhaafsiisan xaq u yeelashada gargaarka daryeelka carruurta ay ka kooban yihiin tiro aan u sinnayn oo ka mid ah shaqaalaha muhiimka ah, taasoo awood u yeelashada daryeelka carruurta ka dhigeysa arrin halis ah oo haysata dadka aan dhammaanteen ku tiirsannahay.
- Qoysas badan ayaa u wareegay daryeelka aan rasmiga ahayn ee Qoyska, Saaxiibbada & Deriska, gaar ahaan bulshooyinka midabka, si ay gacan uga geystaan xal u helida dhibaatooyinka ka jira qorshayaashooda daryeelka carruurta. Si kastaba ha noqotee, daryeel bixiyayaasha FFN waxay haystaan ilo/kheyraadyo yar oo ay ku bixiyaan daryeel tayo leh iyo waxbarashada hore oo loogu talagalay carruurta yaryar waqtiga 90% maskaxdoodu soo korayaan.



Barnaamijka Child Care Aware ee Washington wuxuu ugu baaqayaa sharci-dejiyayaasha inay maal-galiyaan helitaanka daryeelka carruurta si loo dadajiyo ka soo kabashada dhaqaale ee aafada, iyo:

- 1 Si loo yareeyo lacagaha ay qoysaska uqalma Xiriirada Shaqada ku bixiyaan Daryeelka Carruurta si waalidiin badani ay awood ugu yeeshaan inay shaqeeyaan
- 2 Si loo balaariyo/kordhiyo gargaarka daryeelka carruurta ee qoysaska ka sareeya 200% FPL si markaa shaqaalaha muhiimka ah ay u awoodaan inay shaqeeyaan
- 3 In la balaariyo taageerada loogu talagalay daryeelayaasha Qoyska, Saaxiibbada & Deriska si ay u bixin karaan waxbarashada hore ee muhiim u ah carruurta